Nidaamka Hoyga ee Xarunta Dib-U-Celinta Kærshovedgård

1. Guud ahaan

Hadafka
Nidaamka hoyga xarunta dib-u-celinta Sjælsmark waxuu hadafkiisu yahay in la hubiyo deganaanta iyo nidaamka xarunta dib-u-celinta, loona abuuro amni dadka degan xarunta, kuwa martida ku ah iyo shaqaalaheedaba.

Maadaama aad tahay qof degan xarunta waxaa lagaa rabaa inaad fulisid ama raacdid waxay shaqaaluhu kuu tilmaamayaan (sheegayaan).

2. Xeerka Dejinta

Kolkaad timaadid Xarunta Dib-U-Celinta
Kolkaad timaadid xarunta waxaa qolalka xarunta lagaa siin meel, waxaa kale oo lagu siin warbixin guud oo ku saabsan meesha.

Waajibaadka
Waxaa waajib kugu ah inaad ku negaato (joogtid) xarunta.

Haddii waajib lagaaga dhigo inaad xarunta mar walba joogtid waxaad ogolaansho weydiisan kartaa hay'adda ajaanibta kolkaad rabto inaan meelo xarunta bannaankeeda ah soo seexatid.

Haddii aysan waajib kugu ahayn inaan joogtid xarunta waxaad ogolaanshe weydiisanaysaa ciidanka asluubta illaa 3 maalmood inaad xarunta uga maqnaankartid. Wixii ka badan saddex maalmood waxaad ogolaanshaha weydiisan hay'adda ajaanibta.

Haddii lagu saaray inaan isasoo xaadirisid (soo sheegtid joogitaankaaga), waa inaad iska soo xaadirisid booliska sida uu qabo go'aankii laga gaadhay arrintaas ee aad heshay.

Haddii lagu saaray inaad isa soo wargelisid (soo sheegtid), waa inaad isa soo sheegtaa sida uu qabo go'aankii laga gaadhay arrintaas oo aad heshay.

Haddii aadan si dhab u joogin xarunta waxaa laguu qorayaa inaad maqantahay. Waxaa kale oo laguu qori inaad maqantahay haddii aadan saddex maalmood soo doonanin boostadaada ama aadan u imaanin shaqaalaha kadib markay kuu yeedheen.
Kamaqnaanshaha xarunta ee sharci darrada ahi waxaad ku waayaysaa xuquuqdii kaalmada caafimaadka. Waxaa kale oo lagu waayayaa xuquuqdii kaalmada dhaqaale qofkii qaadan jiray.

Joogitaan la'aanta qofka xarunta waxaa loo sheegayaa loona gudbin booliska iyo hay'adda ajaanibta. Alaabtaada waxaa lagu guri baakado waxaana la geyn bakhaarka (3 bilood kadibna waa la iska tuuri)

Boostada iyo Wargelinta
Waa inaad maalin walbaa hubisid inay kuu taallo boosto. Waa inaad wixii xog ah ee ku cusub xarunta ka akhrisataa shaashadda ogeysiiska.

Gelitaanka
Mar walba oo aad soo gelaysid ama ka baxaysid xarunta waa inaad tustaa kaadhkaaga qaxootinimada ama kaadhka gelitaanka xarunta. Waxaa xarunta lagasoo gelikaraa oo keliya goobta koontaroolka (goobta la iska hubiyo). Waa inaad tustaa kaadhkaaga qaxootinimada iyo midka furahaaga ahba kolkay ku weydiiyaan shaqaaluhu. Kaadhka furaha ahi waxaad ku gelikartaa goobaha xarunta ka tirsan ee laguu ogolyahay inaad joogi kartid. Kaadhka furahu waxuu gaar u yahay qofka leh, lamana ogola inaad dad kale siisid. Adiga ayaa lagaa rabaa inaad mar walba cusbooneysiisid kaadhka furahaaga.

Xayn-daabka (bowdka kore)
Ma taaban kartid ama ma fuulikartid xeyndaabka kore ama kuwa gudaha ee xarunta.

Joogitaanka Xarunta Gudaheeda iyo Dibadeedaba
Lama ogola inaad joogtid (istaagtid) intii waqti ah xarunta horteeda. Waxaa kale oo laguu ogoleyn inaad tagtid adigoon hawl ka haynin goobaha gaarka u ah ciidanka asluubta, ams'uuliyiinta kale ama dadka alaabta keenaya xarunta. Joogitaanka ama maritaanka xarunta bannaankeeda waa inuu tixgelin siiyaa deriska xarunta, gaadiidka maraya wadada iyo dadka kale ee nawaaxigaas isticmaalaya.

Deganaanta Habeynkii (shanqadh la'aanta habeynkii)
Xaruntu waa inay deganaantaa (shanqadh la'aan noqotaa) habeynkii inta u dhaxeysa 23.00 – 7.00.

3. Qolka iyo Agabka

Qolka
Waa inaad degtaa qolka laguu asteeyay (lagu siiyay). Shaqaalaha ayaa go'aaminaya goobta lagu dejinayo.

- Waa inaad qolkaaga, suuligaaga iyo qalabka yaalaba nadiif ka dhigtaa, wareejisaana iyagoo ah sidii lagugu siiyay.
- Maalin walba waa inaad laydhisaa qolkaaga, adigoo tixgelinaya hawada gudaha.
- Haddii aad leedahay weel-dhaqa iyo wixii la mid ah, waa inaad nadiifisaa shay walbana meeshiisii dhigtaa mar walba.
- Darbiga ma daloolin kartid ama musmaar kuma garaaci kartid ama isbedel kuma sameyn kartid dhismaha siduu yahay.
- Adigoon ogolaanshe ka haysanin shaqaalaha qalab guri oo aan ahayn kuwa horey u yaallay qolka ma keensan kartid, ama kama saari kartid ama ma tuuri kartid kuwii horey u yaallay.
- Qolka kuma sameysan kartid cunto, kumana rakiban kartid agabka guryaha ee korontada ku shaqeeya sida kululeysada, shooladda cuntada lagu kariyo iwm.
- Qolkaaga waad ku haysan kartaa alaabta yaryar ee korontada ku shaqeysa sida makiinadda timaha lagu jarto ama makiinadda timaha lagu qallajisto.

- Xayawaan kuma haysan kartid xarunta. Lama ogola inaad cunto siisaa xayawaanka xarunta jooga sida bisadaha, shimbiraha iwm.

Goobaha la wadaago (dadka ka dhexeeya)
Iyadoo la tixgelinayo marinka degdegga loogu baxsado waa in alaabta laga ilaaliyaa in la dhigo dhammaan marinada qolalka u dhaxeeya. Goobaha la wadaago waa inay nadiif ahaadaan lagana aruuriyo wixii yaalla. Qashinka waa in lagu ridaa saxaaradda weyn ee qashinka. Agabka sida kuraasta iyo miisaska waa in looga tagaa iyagoo habeysan nadiifna ah.

Burburinta xarunta ama agabka kale waxaa loo sheegi booliska, waxaana lagusoo dallacayaa mag-dhaw. Intaas waxaa dheer in loo gudbin hay'adda ajaanibta.

Alaabtaada (Agabkaaga)
Wixii lagama marmaan ah ee agab ah qolkaaga waad ku haysan kartaa, laakiin adiga ayaa xil kaasaaran yahay ilaalinteeda. Alaab kale waa la keensan karaa qolka haddii ay jirto meel banaan oo la dhigi karo. Alaab waaweyn ma keensan kartid adigoon ogolaanshe ka haysanin shaqaalaha.

Gelitaanka Shaqaalaha ee Qolkaaga
Waxaa lagama maarmaan noqon karta in shaqaalaha xaruntu galaan qolkaaga. Tusaale ahaan kormeer iyo datactir lagu sameynayo qolkaaga qalabka ku xidhan iwm. Sida caadiga ah waxaa lagu weydiin ogolaansho in qolkaaga la geli karo, laakiin haddii gelitaanka qolkaagu degdeg noqdo waxaa lagama maarmaan noqonaysa in shaqaalhu galaan qolkaaga xitaa adigoo maqan ama ogolaanshe dhiibin. Waxay sidaasi ku imankartaa sida in dab ka kaco, biyo furmaan oo dhismaha waxyeelaan, la dagaalanka cayayaanka derbiga iwm.

Haddii aad ogolaanshaha diidid, waxay noqonaysaa in booliska laga codsado caawin si loo galo qolkaaga.

Gaadiidka iyo Baaskiilka
Gaadiidka matoorka leh waa in la dhigaa goobaha loo asteeyay. Baaskiilka lama soo gelin karo xarunta. Baaskiilada waa in la dhigtaa goobaha loo sameeyay.

4. Dhaqanka iyo Fal-Dambiyeedyada

Hab-dhaqanka Guud
Waxaa muhiim ah inaad tixgelisaa dadka kale ee kula degan xarunta xilli walba maalintii.

Xarunta Dib-U-celinta waxaysan haba yaraatee loo dulqaadanaynin wixii gacan-kahadal ah, handadaad iyo kala faquuqid iyo dhaqanka xad-gudubka ah.

- Waxaa reeban inaad ula dhaqantid si xad-gudub leh dadka kale.
- Dadka kale lama ogola inaan handadid.
- Lama ogola inaad qof kale ku faquuqdid ruux ahaan waxuu yahay (rag ama dumar), da'diisa, wadankiisa, diinta uu haysto ama nooc-galmeedkiisa (sida inuu yahay khaniis ama labeeb)

- Xarunta dhexdeeda kuma qaadan kartid dhar ama walxo kale oo u muuqda inay abuuri karaan deganaan la'aan ama amni darro, ama si kale dadku ay u karaahsana karaan.

Haddii dhaqankaagu xad-gudub ku sameynayo dadka kale ee kula degan ama shaqaalaha waxay keensanaysaa in loo sheego booliska iyo in loo gudbiyo hay'adda ajaanibta.

Fal-Dambiyeedyada
Xarunta dib-u-celinta waxaa haba yaraatee loo dulqaadanaynin wixii fal dambiyeed ah.

Fal-dambiyeedyadaas waxaa kamid ah inaad ku dhex haysatid ama ku dhex iibisid walxaha maan-dooriyeyaasha ah, inaad haysatid hub, inaad xarunta dhexdeeda gacan-kahadal ku sameysid, in lagaa arko ficil handadaad ah, ficil kharbudaad ah, xatooyo, iyo inaad soo gadatid alaab lasoo xaday.
Wixii fal-dambiyeed ah waxaa lagu wargelinayaa booliska waxaana loo gudbinayaa hay'adda ajaanibta xitaa waxa la burburiyay haddii ay qiime badan lahayn.

Diinta
Danmark diintu waa shay ku kooban una gaar ah qofka. Diintaada waad sameyn kartaa wixii ay ku farayso inta ay la saan-qaadayso xeerarka kale ee u yaalla xarunta dib-u-celinta, tixgelinna siinayso dadka kale ee kula degan xarunta iyo shaqaalahaba. Xaruntu ma bixiso adeeg diineed, caawimaadna kama geysato qaabkii uu qofku u cibaadeysan lahaa. Xarunta looma sameyn goob lagu cibaadeysto, lamana ogola inaad ka sameysid. Dadka diinta fidiya ee soo booqanaya xarunta waxay raacayaan xeerka caadiga ah ee u degan dadka soo booqanaya xarunta.

Qaadidda Sawirada iyo Fiidiyowga
Filim kama qaadi kartid ama sawir, codkana kama duubi kartid dadka degan xarunta iyo shaqaalahaba, illaa ay kuu ogolaadaan dadkaasi mooyee.

Sigaarka
Waxaad sigaarka ku cabbi kartaa oo keliya guryaha bannankooda meelaha loo ogolyahay. Waxaa goobahaas lagu calaamadeeya calaamaddii sigaar cabka. Qolkaaga sigaar waad ku cabi kartaa haddii ay dadka kula degan oo dhan ay ogol yihiin. Sigaar cabbidu waa in mar walba tixgelin lasiiyaa dadka kale ee kula degan iyo shaqaalaha.

Khamriga
Khamriga kuma cabbi kartid goobaha lawada wadaago.

Mar walba oo khamriga la cabbayo waa in tixgelin la siiyaa dadka kale ee ku nool xarunta iyo shaqaalahaba.

Dabka
Lama ogola inaad dab iwm ku shidid aqalada gudahooda ama bannaanka xarunta dib-u-celinta.

Shirka (ganacsiga) xarunta dhexdeeda.
Lama ogola inaad shirkad ku dhex lahaatid xarunta dhexdeeda sida inaad alaabo kala duwan ku dhex iibisid ama shaqo lacag aad ku helaysid aad ku qabatid.

Qashinka
Qashinka kuma tuuri kartid xarunta dhexdeeda. Wixii qashin ah waxaa lagu tuurayaa baaldiyada iyo saxaaradaha waaweyn.

5. Hawlaha iyo Wixii la siinayo Dadka degan xarunta

Hawlaha
Waa inaan ka qaybqaadataa waxbarashada iyo hawlaha kale sida ku taalla heshiiskaaga:

- Waxbaridda waxaa qaabilsan laan-qeyrta cas.
- Hawl-gelinta sida dayac-tirka fudud iyo nadaafadda xarunta dib-u-celinta.
- Kala ururinta iyo nadaafadda qolkaaga (hawl todobaadle ah)
- Iyo hawl-gelinno kale

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay inaad ka qayb-qaadatid:

- Hawlaha ay fulinayso laan-qeyrta cas
- Hawlaha la qabsado xilliyada firaaqada la yahay.

Cunteynta
Waxaa lagaa siinayaa cunto makhaayadda xarunta. Waxaa la cunteeyaa waqti go'an, kuwaas oo ku yaalla boodhka makhaayadda.

Cuntada waa in lagu cunaa makhaayadda. Waxaa laga soo reebi karaa kolkay jirto xanuun. Lama ogola in makhaayadda laga bixiyo maacuunta sida koobabka, saxuunta, qaadooyinka iyo fargeetooyinka iwm.

Caafimaadka
Rugta caafimaadka ee xaruntu waxay guud ahaan furan tahay 3 maalmood gelikooda hore todobaadkiiba, halkaas waxaa kugu eegi kara kalkaaliso caafinad waxaa kale oo aad arki kartid dhakhtar. Wixii intaa dheer rugtu waxay ufuran tahay oo keliya ballamaha la sameeyay. Xilliyada ay furan tahay waxay ku yaallaan shaashadda ogeysiiska ee xarunta.

Booqashada
Waxaad xaq u leedahay in lagugu soo booqdo xarunta inta u dhaxeysa 9.00 illaa 22.00, waase inaad kahor ballan ka sameysatay shaqaalaha. Dadka kusoo booqanayaa waa inay ilaaliyaan nidaamka hoyga, kamana ogola inay habeynkii seexdaan xarunta ama joogaan makhaayadda intay booqashadoodu socoto. Dadka kusoo booqanayaa intay kula joogaan waa inaad mar walba adigu la socotaa.

Internet
Internet-ka (Wi-Fi) oo ay xaruntu ku siinayso waxaad ku xidhan kartaa kombiyuutarkaaga, telefoonkaaga gacanta, tablet-kaaga ama kombiyuutarka. Inticmaalka internet-ka waxaa jari ciidanka asluubta.

Dabka iyo amniga
Waxaa waajib kugu ah inaad taqaanid qorshaha badbaadinta ee dabka iyo masiibooyinka , kaas oo aad ka helaysid dhismayaasha degaanka.

6. Mas'uuliyadda

Mas'uuliyadda mag-dhawga
Waxaad soo galeysaa mas'uuliyadda mag-dhawga ee caadiga ah sida uu qabo qaanuunka danishka. Kharbudaadda agabka xarunta iwm waxaa loo sheegayaa booliska iyadoo loo gudbinayo ha'adda ajaanibta.

Caruurta
Caruurta aan qaan-gaadhka ahayn waxaa mas'uul ka ah waalidkood, waalidkuna waxay mas'uul ka yihiin falkooda. Waalidku ama qof kale oo uu u wakiishay waa inuu isha ku hayaa caruurta aan qaan-gaadhka ahayn.

7. Jabinta nidaamka hoyga

Jabinta nidaamka hoyga waxuu saameyn ku yeelanayaa xaaladda dejintaada sida meesha lagu dejin iyo cidda booqashada kuugu imanaysa.

Ciidanka Asluubta 18. April 2018

Husorden for Udrejsecenter Kærshovedgård/Somali